



**UJEEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 04/12/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

**WAKAALAD BIXISO:-** HABIBO MOHAMUD SIYAD, Hooyo: Xaliimo Maxamuud Wehliye, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 01/01/1960, Sidata Somali Passport, Lr. P01333162

**LA WAKIISHE:-** ISMAIL MOHAMUD SAID, Ina Nuuro Maxamuud Cosoble, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 01/02/1988, Sita Somali Passport, Lr. P01117593

**TILMAAMAHA GURIGA**

Guri Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: (**Warta Nabadda**), Cabirka: (**13.50X13.50-Mt**), oo La'eg 182.25m<sup>2</sup>, Looto No: **1424**, Leh Warqadda Lahaanshaha Sabarlog No.17/16/2025, Tr.30/11/2025, Leh Warqadda Lacag Qabashada No.2511290030/1, Tr.29/11/2025.  
Kana Soo Wada Baxeen Dawladda Hoose ee Muqdisho


**B-** Aniga oo ah **HABIBO MOHAMUD SIYAD**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Walaalkey **ISMAIL MOHAMUD SAID** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Guriga Sare Ku xusan ee aan ka dhaxlay Hooyadeey Marxuumad **XALIIMO MAXAMUUD WEHLIYE**, in Qaybtayda uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, dhaxalkoob u sameen karo, dhisi karo, ijaari karo, dukumiinti duplicate ah u dalbi karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, iigana doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **ISMAIL MOHAMUD SAID** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Qeybta aan ku leeyahay Gurigaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **ISMAIL MOHAMUD SAID**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiiyay Walaashay **HABIBO MOHAMUD SIYAD**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA**  
HABIBO MOHAMUD SIYAD

*Xabubo*

*Zakariya*

**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**  
ISMAIL MOHAMUD SAID

*ismaaciil*

1- ZAKARIYA AHMED ADAN NOOR

*Calaz*

2- ABDIRABI MOHAMED DHUNKAL

**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

REP. 1993/T.P.N/25, Tr. 04/12/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **HABIBO MOHAMUD SIYAD** Ahna (Wakaalad Bixiso), 2- **ISMAIL MOHAMUD SAID** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana ay ka Mid noqonayeen Nuqul.

By: C/qani



NOOTAAYAHA

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**

*Signature*





DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO  
WAAXDA DHULKA

No: **00816**

Soo Gelidda Warqadda

Tirsi: MUN-0905-T0Q9BR/1

Taariikh: 30/11/2025



Bollettario No: 17  
Bolletta No: 16  
Sanadka: 2025

**WARQADDA LAHAANSHAHA DHULKA**

Mud. / Mar. Xalimo Maxamuud Wehliye

Og. Tal. / Ciidanka Booliska Dowladda Hoose Muqdishu - Xamar

Mudanaha / Marwada kor ku qoran waxaa loo ogolaaday inuu / iney dhiso caruur, barako, ama

Guri Dhagax ah 13.50 X 13.50 oo uu ka dhiso cad dhul ah oo lo'eg

182.25 M<sup>2</sup> kuna yaal xaafadda Warta nabadda soohdintusuna tahay 1424


X. Waqooyi X. Galbeed X. Bari

X. Koonfur

Warqadda lacag qabashada No. 2511290030/1 ee 29/11/2025

Muqdishu. Taariikh: 30/11/2025

Agaasimaha Waaxda Dhulka



Duqa Magaalada



## FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 11/12/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Ismaaciil Maxamuud Siyaad** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1993/T.P.N/25, Tr. 04/12/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca La Wakiishaha</b>	Ismaaciil Maxamuud Siyaad
<b>La Wakiishay</b>	Dhul
<b>Cabirka</b>	13.50X13.50
<b>Ku Yaallo</b>	Muqdisho, Degmada Warta Nabada
<b>Lotto Lambar</b>	1424
<b>W.M.L</b>	Sabarloog 17/16/2025, Tr. 30/11/2025 Rasiid Lam. 2511290030, Tr. 29/11/2025
<b>Taariikhda Wakaalada</b>	04/12/2025

**La Wakiishe:** Aniga oo ah **Ismaaciil Maxamuud Siyaad**, Degan **Muqdisho** Tel **0615820205** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

**Maxamed Cabdi Cali**

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

**Ismaaciil Maxamuud Siyaad**

*Ismaaciil*